# Waa Maxay Mas'uulka Ka Caawiya Dacwadda (Guardian Ad Litem)?

What Is a Guardian Ad Litem?

## Muhiim!

Qoraalkan waxa aad ku ogaan doontaan mas'uulka maxkamadda iyo waxyaabaha ay qabtaan. Waxa kale oo ku ogaan doontaan faraqa u dhaxeeya mas'uulka iyo wakiilka maxkamadda. Waxaa laga yaabaa in looga jawaabo dhamaan su'aalaha qabtaan. Dhageysiga Maxkamadda, haddii aad wax su'aal ka qabto yaa u doodaya ilmaha, yaa u doodaya waalidka, ama yaa xaq u leh qareen, **weydii** qaaliga markiiba.

## Muxuu loola jeedaaa "wakiilka maxkamadda"?

Mas'uulka (A guradian) waa qof ilaaliya ama caawiya qof kale. "Ad litem" waxaa loo jeedaa "dacwadda". Waxaa jira caawiyayaasha maxkamadda ee dacwadaha kala duwan. Dacwadaha qaarkood, qaaliga ayaa magacaaba "guardian ad litem" si uu ula shaqeeyo ilmaha ama qofka naafada ah oo ku adag tahay in ay fahmaan dacwada ay qeybta ka yihiin. Xaaladaha kale, dacwadaha cidda ilmuhu la noolaanayaan ama dayaca ama xad gudubka, waxaa laga yaabaa in ay baaritaan sameeyaan oo ay u doodaan halka ay ku jirto danta ubadka.



## Maxay qabtaan Mas'uulka Maxkamadda?

Mas'uulka Maxkamadda (Guardians ad litem) ayaa maxkamadda wargeliya sida ay ku jirto danta ilmaha sida cidda uu la noolaanayo iyo booqashada waalidka. Waxa ay sameeyaan baaritaan *madax banaan*. Ma shaqaale ka tirsan maxkamadda ama badbaadada caruurta.

Waxa ay la hadlaan ilmaha, waalidka iyo dadka gacanta ku haya ilmaha. Waxa ay si gaar ah ula hadli karaan la taliyayaasha, xubnaha qoyska iyo saaxiibada, iyo shaqaalaha maxkamadda iyo badbaaadada caruurta.

Waxa ay warbixin u soo qoraan maxkamadda iyaga oo talo siiya qaaliga. Qaali khasab kuma ah inuu raaco talada ay soo jeediyaan laakiin warbixinta aad ayuu u tixgeliyaa.

Waa muhim in aad la shaqeyso oo gacan saar la leedahaya mas'uulka ka socda maxkamadda (guardian ad litem). Warbixinta ay qoraan way caawin kartaa ama dhaawici kartaa dacwadaada. Xusuusnoow: sida ugu wanaagsan oo ay ku jirto maslaxadda ilmahaaga in ay kuu noqoto muhimadda koowaad.

## Mas'uulka maxkamadda ma qareen ilmaha u doodayaa?

Maya. Mas'uulka maxkamadda waa mid madax banaan oo go'aankooda iskood u gaara iyo sida ay ku jirto danta ilmaha. Ma aha oo kaliya waxa uu ilmuhu doonayo.

## Mas'uulka maxkamadda ma qareen baa?

Maya inta badan. Degmooyinka qaarkood, sida Hennepin qaar badan oo ka mid ah waa qareeno. Degmooyinka, mas'uulka maxkamadda waxa uu noqon karaa kuwo la tababaray, qof weyn oo daneynaya laakiin aqoon kala duwan leh. Haddii aanu mas'uulka maxkamadda aheyn qareen, waxaa laga yaabaa in ay qareen la shaqeeyaan.

## Goorma ayaa qaaligu magacaabaa mas'uulka maxkamadda?

- Maxkamadaha qoyska, waa *waajib* in qaaligu magacaabo mas'uulka maxkamadda haddii uu qaaligu u maleynayo in ilmaha dhaawac loo geystay, si xun loola dhaqmay, ama dayac lagu sameeyey. Ama haddii lagugu xukumay dambiya qaarkood. Ka eeg warqadayada xogta aruursan ee *Waqtiga Waalidka (Booqashada) iyo Qorshayaasha waalidka*

- Maxkamadaha caruurta, waa *waajib* inuu jiro mas'uulka maxkamadda ee ilmaha la dayacay, gacanta lagu hayo, ama ilmaha u baahan in la badbaadiyo (dacwadaha CHIPS).

- Qaaliga ayaa magacaabi **kara** mas'uulka maxkamadda ee dacwadaha qoyska ama caruurta, laakiin waajib kuma aha.

## Yaa bixiya lacagta mas'uulka maxkamadda?

Waxaa laga yaabaa in mas'uulka maxkamadda lacag la'aan ku shaqeeyo ama lacag ku shaqeeyo. Haddii uu lacag qaadanayo, maxkamadda ayaa cadeyneysa cidda bixineysa kharashka mas'uulka maxkamadda. Haddii lagu siiyo gargaarka MFIP ama gargaarka kale ee dadweynaha, ama haddii aad qareen ka codsatay Legal Aid, ama haddii uu dakhligaagu yar yahay, waxaa lagaa qaadayaa lacag yar, ama laga yaabaa in aadan lacag bixin.



## Waalidka ama caruurtu mala iman karaan qareen gaar ah?

Waalidiintu waxa ay mar kasta xaq u leeyihiin in ay la yimaadaan qareenkooda u gaarka ah.

- ***Maxkamadaha caruurta***, haddii aanu waalidku awoodin inuu qabsado qareen, waxaa laga yaabaa in loo qabto qareen lacag la'aan ah. Dacwadaha caruurta intooda badan, waxa uu ilmuhu xaq u leeyahay qareen lacag la'aan ah haddii aanu ilmuhu qabsan karin qareen. (Waxaa laga yaabaa in maxkamaddu amarto in waalidku bixiyo lacagta qareenka ilmaha, haddii ay awoodi karaan.)

- ***Maxkamadaha qoyska***, ilmuhu xaq uma laha qareen. Waalidku xaq ayey u leeyihiin qareen, laakiin ma aha mid lacag la'aan ah.

## Waa maxay faraqa u dhaxeeya mas’uul iyo mas’uulka maxkamadda (a guardian ad litem)?

Mas’uulku aad ayuu uga duwan yahay mas’uulka maxkamadda. Mas’uul, ama cidda ilmuhu la nool yahay, waa qofka ilmuhu “la degan” yahay oo u ah sida waalidka oo kale  Iyaga ayaa go’aan u gaara ilmaha oo bixiya kharashka nolosha ilmaha. Mas’uulka ilmaha ayaa go’aan ka gaara halka ilmuhu degayo iyo sida ilmaha loo korinayo.

Mas’uulka maxkamadda (A guardian ad litem) ilmaha gacanta kuma hayo mana xanaaneeyo ilmaha. Maxkamadda ayey kala shaqeeyaan sida ay u gaari laheyd go’aan ay ku jirto sida ugu wanaagsan danta ilmaha.

Dadka qaarkood, oo ay ka mid yihiin qaaliyada iyo qareenada ayaa mas’uulka maxkamadda ugu yeera “mas’uulka.” Xusuusnaada in labadoodu kala duwan yihiin.



*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**